WARBIXINTA HEERKA NATIIJO FASALEEDKA

AKHBAAR KU SOCOTA WAALIDKA

Calgary Board of Education

Waxbaridda Maanta Ee Muwaadiniinta Mustaqbalka

Buuggan waxaa loo diyaariyey inuu ka caawiyo waalidiinta inay fahmaan Warbixinta Heerka Natiijo fasaleedku (HNF), taasoo ay hirgalinayso Waaxda Waxbarashadda Alberta, laga bilaabo bisha Juun 2007 ka maadooyinka kala ah: Xirfadda Luqadda Ingiriisiga, Xirfadda Luqadda Faransiiska (Immersion) iyo Xisaabta ayaa si gaar ah loo fiirinayaa.

Warbixinta Heerka Natiijo Fasaleeddku ma beddeli doonto qaabka ay macalimiintu hadda u tabiyaan natiijadda ilmahaaga. Macalimiintu waxay sii wadi doonaan inay si caadi ah kuugu soo diraan warqadda natiijadda oo ay ku dhan tahay horumarka ilmahaaga. Waxay kugu martiqaadi doonaan dugsiga kuguna tusi doonaan shaqadda ilmahaaga kaalana hadli doonaan horumarkooda. Waxay soo dhaweyn doonaan wicitaankaaga iyo e-mail-kaaga wakhti kasta oo aad rabtid inaad ka xaajootid natiijadda ilmahaaga. Macalimiintu waxay si wadajir ah oo niyadsan kaala shaqeyn doonaan waxbarashadda ilmahaaga.

Warbixinta Heerka Natiijo Fasaleedku waa akhbaar dheeri ah oo aad heli doontid oo ku saabsan natiijadda ilmahaaga. Tobbon sanno ka hor ayaa laga hirgaliyey tabinta HNF-ka Guddoonka Waxbarashadda ee Edminton in kastoo ay ku cusub tahay Kalgari, taasoo ay sababtay waalidiinta oo codsaday inay helaan akhbaarta waxbarashadda ilmahooda. Dhowr sanno ka hor nidaamka dugsiyadda Barkland ayaa bilaabay u tabinta HNF-ka waalidiinta. Haddaba Guddoonka Alberta wuxuu doonayaa in dugsiyadda oo dhan ay waalidiinta iyo Guddoonka Albertaba siiyaan akhbaarta HNF-ka.

Qaar ka mid ah akhbaarta ku qoran buuggan yar ayaa laga soo minguuriyey Buug-gacmeedka Macalimiinta iyo Maamulka ee Guddoonka Waxbarashadda Alberta, 2006, Warbixinta Heerka Natiijo Fasaleedka.

WARBIXINTA HEERKA NATIIJO FASALEEDKA:

AKHBAAR SAAMEYSA WAALIDIINTA

Waxaan rajaynaynaa in buuggan yari ka jawaabi doono su'aalo badan oo saameeya HNF-ka. Fadlan haddii ay jiraan su'aalo aad ka qabtid HNF-ka ilmahaaga waxaad kala xiriirtaa macalinkiisa.

1. Waa maxay Warbxixnta Heerka Natiijo Fasaleedku ama HNF-ku?

Guddoonka Waxbarashadda ee Alberta wuxuu macalimiinta fasaladda 1aad ilaa 9aad ugaga baahan yahay HNF-ka arday kasta oo wax ku dhigta nidaamka ku salaysan fasaladda ee Alberta ee maadooyinka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga, Xirfadda Luqadda Faransiiska (Immersion) iyo Xisaabta.

HNF-ka waxaa loo tabin doona si wadajirta. Waxay noqon doontaa tilmaame balaaran oo mideyn doona akhbaaraadkii faahfaahsanaa ee aad helaysay sannadka oo dhan kuna saabsanayd natiijadda ilamahaaga ee warqadihii warbixinta iyo waliba kulamaddii macalinka.

Inta badan ardaydu waxay dhigtaan nidaamka fasalaysan ee Waxbarashadda Alberta ee maadooyinka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga, Xirfadda Luqadda Faransiiska (Immersion) iyo Xisaabta sidaas darteed ardaydani waxay heli doonaan warbixinta HNF-ka. Waxaa jiri doona tixgalin gaara: fiiri su'aalaha tiradoodu tahay 8 ilaa iyo 10 ee bogagga 6aad iyo 8aad.

© Calgary Board of Education 2007

2. Sidee ayey macalimiintu ku heleyaan Heerka Natiijo Fasaleedka uu gaarsiisan yahay ilmahaygu?

Barnaamijka Waxbarasha ee Alberta (manhajka) wuxuu u baahan yahay natiijadda ardayga ee maadooyinka fasal kasta, macalinkuna wuxuu HNF-ka ardayga kala soo dhex bixi doona natiijooyinkan.

HNF-ka ardaygu waxay ku salaysnaan doontaa **caddeymaha natiijooyinkiisa/keeda** ee laga soo aruuriyey dhammaan shaqaddii fasalka iyo qiimeyntii sannad dugsiyeedka oo **dhan.**

Guddoonka Alberta wuxuu aqoonsan yahay, in isla fasal, ay ardaydu muujjin karaan natiijooyin aad u kala duwan. Natiijooyinkoodu waxay noqon karaan mid uu arday aad u fiicnaan karo halka mid kale uu ku liidan karo. Ardaydu uma baahna inay takhasus gaar ah u yeeshaan fasal gaar ah si ay u gaaraan natiijadda la aqbali karo ee manhajka fasalkaas.

Heerka Natiijo Fasaleedka Siman

Heer la Aqbali Karo **Heer Aad u Wanaagsan**

Baaxadda waajib Gudashadda

© Calgary Board of Education 2007

HNF-ka **laguma** salayn **karo** hal imtixaan oo kaliya.

HNF-ka **laguma** saleyn **karo** minguurin caadi ah ee imtixaan guud oo ay soo saartay shirkad wax daabacda. Imtixaanadani waxba kama khuseeyaan natiijadda ardayda ee barnaamijka Waxbarashadda Alberta. Darajoonka imtixaanadani uma dhigmaan la midna ma aha kuwa HNF-ka. Sidaas daraadeed, looma isticmaali karo qiimeynta heer fasaleedka uu gaarsiisan yahay manhajka ardaygu. (*Fiiri Warbixinta Heerka Natiijo Fasaleedka Buug-gacmeedka Macalimiinta iyo Maamulka*, bogagga 29aad ila 32aad, si aad u heshid akhbaar dheeri ah.)

HNF-ka **laguma** salayn **karo** arrimaha ay ka midka yihiin ka qaybgalka, dabeecadda, hufnaanta, dadaalka ama anshaxa.

U kuurgalka waxa ardaydu sameeyaan iyo yiraahdaan



La sheekeysiga ardayda ee sida
Ay u fahamsan yihiin shaqadooda.

Imtixaanka shaqadda ardayga
(wargeysyadda, shaqo gudashadda, waajibaadka gaarka ah, xilalka, imtixaanadda, iwm.)

Macalimiintu waxay isticmaalayaa habab tiro badan si ay u aruuriyaan macluumaadka natiijooyinka ka soo baxo waxbarashadda ardayga.

© Calgary Board of Education 2007

3. Sidee ayaa la iigu soo gudbinayaa Heerka Natiijo Fasaleedka ilmahayga?

HNF-ka ilmahaagu waa mid wadajirta oo lagu arki doono sanduuq gaar ah oo ku dhex yaala warqadda warbixinta natiijadda ilmahaaga ee bisha Juun. Jabjab iyo jajab tobanle midna lama isticmaali doono.

Laga bilaabo bisha Juun ee sannadka 2007 waxay warbixinta HNF-ka ee Xirfadda Luqadda Ingiriisiga, Xirfadda Luqadda Faransiiska (Immersion) iyo Xisaabtuba soo bixi doontaa sannadkiiba hal mar.

4. Maa maxay sababta aan uga warbixinayno Heerka Natiijo Fasaladdedka?

Warbixinta HNF-ku ee Waxbarashadda Alberta waxay akhbaar qaali ah sannad walba siinaysaa gobolka, deegaanadda dugsiga iyo dugsiyadda taasoo saameysa natiijadda ama aayaha ardayda fasaladda 1^{aad} iyo 9^{aad}.

Akhbaarta HNF-ka laga helo waxay caddeyn u helaysa sida barnaamijyadda kala duwan u shaqaynayaan marka loo eego ardayda kala duwan iyo waliba sidii loo horumarin lahaa natiijooyinka ama aayaha ardayda.

Akhbaarta NHF-ku waxay akhbaar caawisa siin doontaa hay'adda samaysa barnaamijyadda iyo waliba go'aan ka gaaridooda ee heer gobol, deegaaan iyo heerar dugsi.

© Calgary Board of Education 2007

5. Waa maxay macnaha ay ardayda u samaynayso Heerka Natiijo Fasaleedku?

Guddoonka Waxbarashadda Kalgari (GWK) wuxuu isku taxalujiyey inuu macalimiinta kala shaqeeyo sidii loo ururin lahaa waxa ka soo baxda waxbarashadda ardayda marka loo fiiriyo Barnaamijka Waxbarashadda ee Alberta ee Xirfadda Luqadda Ingiriiska, Xirfadda Luqadda Faransiiska (Immersion) iyo Xisaabta.
Haddaba marka la helo HNF-ka iyo waxa ka soo baxa waxbarashadda ardayga, waxay macalimiinta ka caawin doontaa inay qorsheeyaan qaabka ay wax u bari lahaayeen ardayga taasoo ku salaysan baaxadda baahidiisa iyo hibadiisa.

HNF-ku waxay ardayda u suurta galin doontaa inay si muuqata uga qaybqaataan hanaan daraasadeedka (tusaale: fahamka yoolka waxbarashadda, daraasadda shakhsiga ah iyo dajinta yoolka la beegsanayo).

6. Tabinta HNF-ka macnihiisu ma waxaa weeye in ardayda qaarna dib u celin lagu sameynayo qaarna si dhakhso ah ay ku dhamaynayaan waxbarashadooda?

HNF-ku waxba kama beddelayo nidaamka dhaqameedka GWK marka laga hadlayo dib u celin ama dedejinta.
Cilmi baarid la sameeyey waxay muujinaysaa inaysan dib u celintu iyo dedejintu waxba ka tareynin natiijadda ardayga. Waxaa jira xaaladdo gaar ah, taaso ardayga markii daraasad lagu sameeyey u yeeshay hibo maado gaar ah, cilmi baaridu waxay taageereysaa in ardaygan oo kale lagu dhex hayo saaxiibadiisa balse qaab ka duwan wax loo baro si loo daboolo baahidiisa gaarka ah iyo hibadiisa.

© Calgary Board of Education 2007

Macalimiinta GWK waxay u haqabtiraan hanaan siman oo tayeysan ardayda hanatay heer aad u wanaagsan ee fasaladda ay dhigtaan.

Macalimiintu **ma** tabin karaan heer ka sareeya fasalka ardaygu uu dhigto ilaa iyo mooyee in ay bareen isla markaasna ay daraasad ku sameeyeen **dhammaan** waxa ka soo baxay natiijadda waxabarashadda ardayga ee fasalkaas, ma aha oo kaliya qaar iyaga ka mid ah in la adeegsado.

7. **Waa maxay macnaha ay walidiinta u samaynayso Heerka Natiijo Fasaleedku?**

Walidiintu waxay ogaanayaan HNF-ka caruurtooda marka loo eego Barnaamijka fasaleedka Waxbarashadda Alberta.

HNF-ku wuxuu noqonayaa xaqiijinta akhbaartii ay horayba u helayeen sannad dugsiyeedka oo dhan si loo caawiyo waxbarashadda ilmaha.

8. **Sidee ayaa lagu ogaanayaa Heerka Natiijo Fasaleedka ardayda ay Luqadda Ingiriisku tahay afkooda Labaad (LIL/ESL).**

Ardayda uu Ingiriisigu yahay Luqaddooda Labaad (LIL) ee natiijadoodu ay noqoto darajadda 3^{aad}, 4^{aad} ama 5^{aad} ee Halbeega Wacnaanta ee Luqadda Ingiriisiga ee GWK waxay helayaan HNF-ka sababtoo ah ardaydani waxay wax ku baranayaan Barnaamij fasaleedka Waxbarashadda ee Alberta.

MS/NA(ma saamayso: not applicable) ayaa loo soo gudbinayaa ardayda LIL-ka ah ee natiijadoodu ay noqoto darajadda 1^{aad} iyo 3^{aad} ee Halbeega Wacnaanta ee Luqadda Ingiriisiga ee GWK sababtoo ah ardaydani waxba kuma baranayaan Barnaamijka fasaleedka Waxbarashadda ee Alberta.

© Calgary Board of Education 2007

9. **Sidee ayaa ardayda qaba baahidda gaarka ah ee Barnaamij Qorsheedka Shaqsiga (BQSh) ah loogu gudbinayaa HNF-ka?**
   (Individualized Program Plans –IPP's)

Inta badan ardayda qaba baahidda gaarka ah waxa ku shaqeeyaan maxsuulka waxbarashadda ee Barnaamij fasaleedka Waxbarashadda inkastoo mararka qaar aysan ahayn heerka fasal ee ay dhiganayaan ama ku qoran yihiin. Ardayda noocan oo kale ah waxay heli doonaan HNF-ka.

Waxaa jira tiro yar oo ardayda ka mid ah oo barnaamijyadoodu aysan ku salysnayn maxsuulka waxbarashadda ee Barnaamij fasaleedka Waxbarashadda. Ardaydani waxay ku hawlan yihiin u Diyaargaroowga Waxbarasho, Xirfadaha Aasaasiga ah/ ama Xirfadaha Nolosha. Arrintan oo kale waxaa lagu tilmaami karaa inay tahay barnaamij aan ku dhisnayn hab fasaleedka. Waxbarashadda Alberta ugama baahna ardaydan oo kale tabinta heerka natiijo fasaleedka. Taas beddelkeeda waxy nooga baahan yihiin inaan u gudbino inay gaarsiisan yihiin yoolasha/ujeeddooyinka Barnaamij Qorsheedka Shaqsiga (BQSh).

Mararka qaar aad u yar waxaa dhici karta in barnaamijka ardaygu uu yahay mid gaar ah oo la soo tabiyo Ma Saameyso (MS). Xaaladdan oo kale qof ka mid ah shaqaalaha dugsiga ayaa kula xaajoon doona.

Haddii uu ilmahaagu qaadanayo Barnaamij Qorsheedka Shaqsiga (BQSh), fadlan kala hadal macalinkiisa/ keeda si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan HNF-ka ilmahaaga.

© Calgary Board of Education 2007

10. Sidee ayaa lagu ogaanayaa Heerka Natiijo Fasaleedka ardayda ku diiwaangashan barnaamijyadda habka Dhafan (immersion) ama labadda luqadood.

Ardayda ku diiwaangashan barnaamijka Faransiiska (Immersion) waxay helayaan HNF-ka Xirfadda Luqadda Faransiiska iyo Xisaabaadka fasaladda 1aad ilaa 9aad. Waxay **sidoo kale** heli doonaan HNF-ka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga laga bilaabo fasalka 3aad.

Argayda fasalka 7aad ee mar dambe loo diiwaangaliyey barnaamijka Faransiisku (Immersion) **ma** heli doonaan HNF-ka Xirfadda Luqadda Faransiiska ilaa laga gaaro wakhtiga ay ku biiraan sii joogteenta barnaamijkan ee fasalka 8aad ama 9aad.

Ardayda ku diiwaangashan barnaamijka laba luqadlaha ah ee Mandariinka, Jarmalka ama Isbaanishka waxay u heli doonaan HNF-ka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabaadka si la mid ah barnaamijyadda caadiga ah.

11. Sidee baa loogu gudbinayaa Heerka Natiijo Fasaleedka ardayda qaata maadooyinka Cilmiga iyo Xirfadaha Shaqadda Sahla (Knowledge and Employability)?

HNF-ka ayaa loo gudbin doonaa ardaydan, laga bilaabo fasalka 8aad, waa sannadka ugu horeeya ee ardaydu iska diiwaangeliyaan maadooyinka Cilmiga iyo Xirfadaha Shaqadda Sahla.

Macalinku wuxuu daraasad ku samaynayaa natiijadda ardayga ee la xariirta maxsuulka waxbarashadda ee fasalka 8aad ee maadooyinka Cilmiga iyo Xirfadaha Shaqadda Sahla.

Macalinku wuxuu soo gudbin doonaa HNF-ka fasalka 8aad ee maadooyinka Cilmiga iyo Xirfadaha Shaqadda Sahla haddii uu ardaygu gaaro natiijo heer ahaan la aqbali karo.

© Calgary Board of Education 2007

Haddii uu ardaygu heli waayo maxsuulka waxbarashadda fasalka 8aad ee maadooyinka Cilmiga iyo Xirfadaha Shaqadda Sahla, wuxuu macalinku soo gudbinayaa HNF-ka ardayga ee uu sida caadiga ah uga helay Barnaamijka Waxbarashadda ee Alberta ka hor inta uusan is qorin maadooyinka Cilmiga iyo Xirfadaha Shaqadda Sahla.

12. Waa maxay xiriirka ay Heerka Natiijo Fasaleedku la leedahay Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolka (Provincial Achievement Tests – PAT) ee fasaladda 3aad, 6aad iyo 9aad?

Tabinta HNF-ku waxay ardayga siinaysaa akhbaarta natiijadda heer fasaleedyadda oo dhan taasoo kaabi doonta akhbaarta Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolka.

Tabinta HNF-ku waxay akhbaarta natiijadooda siinaysaa arday badan oo aanan ka qayb galin qoraalka Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolka.

Waxaa macalimiinta u suurta galidoonta inay caddeyn ahaan u adeegsadaan waxa ka soo baxa qayb ahaan Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolka iyo waliba macluumaadka badan ee la aruuriyey sannad dugsiyeedka si loo darso natiijadda maxsuulka waxbarashadda ardayga isla markaana loo helo HNK-kiisa.

HNF-ka uu macalinku ka soo gudbiyo ardayga waxay noqon doontaa guud ahaan mid waafaqsan Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolka. Hase yeeshee, ardayda qaar, waxaa dhacaysa in daraasadda macalinku ardayga ku sameeyo HNF-kiisu inay ka duwanaato Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolka. Macalinku wuxuu daraasad ku sameyn karaa dhammaan maxsuulka waxbarasho ee heerka fasal; Natiijadda Imtixaanadda ee Gobolku waxay kaliya daraasad ku sameyn kartaa maxsuulka lagaga cabir qaato imtixaanadda qoraalka ah ee warqadda iyo qalin loo isticmaalo, waxaana jira amuuro badan oo saameyn ku yeelan kara waajib gudashadda ardayga ee maalinta imtixaanka.

Waxaad akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan soo tabinta Heerka Natiijo Fasaleedka ka heli kartaa website-ka:

http://www.education.gov.ab.ca/ipr/gla/

© Calgary Board of Education 2007



Calgary Board of Education

Prepared by Educational Support Services
with the assistance of
Communications Services

2007-164

GLAR / Somali Translation